*As delivered*

**Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Soomaaliya**

**Warbixin uu siiyay kulanka Golaha Amaanka ka yeeshay Soomaaliya**

**13 Sebtembar 2018**

Marwo Madaxweyne,

Muddada xilhayntayda waxay dhammaaneysaa toddobaadka soo socda. Maalintii aan tagay magaalada Muqdisho bishii Janaayo 2016kii, waxaa toos la ii geeyay Xafiiska Madaxweynaha si aan ugala hadlo hanjabaad ay dowlad goboleedyada federaalka ay u jeediyeen inay hakin doonaan iskaashiga ay la leeyihiin dowladda dhexe.

Markaan ka soo tagay magaalada Muqdisho laba maalmood ka hor, dalku wuxuu ku sugnaa xaalad taa la mid ah.

Dhibaatooyinka saldhigga u ah qaabdhismeedka hay'adaha ee qaabeeya siyaasadda iyo amniga Soomaaliya weli isma bedelin. Laakiin tani waa inaysan qarin horumarka wanaagsan ee la gaaray saddexdii sanno ee la soo dhaafay.

Waxaa dhacay kalaguur awoodda madaxweyne si nabad aha lagu wareejiyay, oo natiijadii ka soo baxdayna la aqbalay inay tahay mid xalaal ah.

Aqal Sare oo cusub oo ka wakiil ah dowlad goboleedyada federaalka ah ayaa la yagleelay. Tirada xildhibaanada haweenka ah ayaa kor uga kacday boqolkiiba 14 oo gaartay boqolkiiba 24%, taasoo ka sarreysa celceliska Afrika iyo midka caalamkaba.

Waxaa laga hortagay macluul dhici lahayd sannadkii 2017, waxaana mahadda iska leh abaabulka qaran, diyaargarowga wanaagsan iyo deeqsinimada deeqbixiyeyaasha oo degdeg dhaqaale u bixiyay. Tani waa arrin inta badan aan la sheegin oo ay wada suurtageliyeen Soomaalida iyo Qaramada Midoobay.

Khariidadda federaalka ayaa buuxinteeda socota. Hal sanno ka hor, ayaa dowlad goboleedka HirShabelle la dhisay.

Waxaa jiray guulo laga gaaray ka hortagga iyo xallinta colaadaha. Waxaa dhowaan ka tallaabay, oo aan ka soo dukaameystay, khadadka u dhexeeya labada dhinac ee magaalada Gaalkacyo, oo ah magaalo ilaa iyo dhowaan ahayd mid aan amaan ahayn oo si xun u kala qaybsan.

Colaadaha kale sida midda u dhexeysa Puntland iyo Somaliland waa laga hortagay iyadoo loo maray hawl diblomaasiyadeed oo xoog leh oo ay wada qabteen Qaramada Midoobay, Urur-Goboleedka IGAD iyo kuwo kale.

Waxaa la dejiyay hanaan wax looga qanto amni darrada ragaadday: Qaabdhismeedka Amniga Qaran iyo Hanaanka Dhammeystiran ee Amniga.

Waxaa la hirgelinayaa qorshaha kalaguurka ee mas'uuliyadda weyn ee amniga oo laga wareejiyo ciidamada AMISOM loona wareejiyo ciidamada Soomaaliyeed. Ciidamada Soomaaliyeed ayaa hadda kala wareegay garoonka cayaaraha weyn ee astaanta u ah magaalada Muqdisho iyo degaanda ku ag yaalla.

Waxaa jirta dowlad leh qorshe dib u habayn oo xoog leh, oo ku tiirsan wada shaqayn xoogan oo u dhexeeya Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi 'Farmaajo' iyo Ra'iisal Wasaare Xasan Khayre.

Waxaa udubdhexaad u ah in dalka laga dhigo mid mudan in la aamino oo lala xisaabtami karo taasoo ah tallaabo loo qaaday si dib loogu hanto gobanimo buuxda, loo yareeyo ku tiirsanaanta dibadda, loona soo jiito maalgashiga guud iyo midka gaarkaba.

Waxaa la fulinayaa shuruudaha Hay'adda Lacagta adduunka (IMF), dakhliga gudaha ayaa kordhaya, maareynta maaliyadda guud ayaa soo hagaagaysa, kalsoonida ganacsiga ayaa kordhaya, waxaana soo dhowaanaysa suurtagalnimada in deymaha la bixiyo iyo deyn cafiska.

Hanaan sharci iyo midka hay'adeed ayaa loo dejinayaa doorashooyinka sannadka 2020. Horumar dhab ah ayaa laga sameynayaa dib eegista dastuurka. Dowlad Goboleedyada Federaalka ayaa aad uga qaybgalayay arrimo dhowr ah si loo qeexo qaabka federaalka Soomaaliya iyo qaabka doorashada sannadka 2020 iyadoo loo marayo shaqada uu hayo Guddiga Farsamo ee Wadaxaajoodka Federaalka.

Hanaan Dibuheshiisiin Qaran ayaa la dejinayaa iyadoo la eegayo dhammaan daneeyeyaasha bulshada Soomaaliyeed ee ka qaybqaadanaya wax ka qabashada cabashooyinka iyo xallinta colaadaha.

Marwo Madaxweyne,

Soomaalidu waxay awood ka heli karaan isbedelladan wanaagsan. Hase yeeshee, qofna waa inuusan ku kedsoomin ama dhayalsanin caqabadaha hortaagan, qaar badan oo ka mid ahna ay yihiin kuwo ku saabsan qaabdhismeedka dowladda.

Soomaalida waxaa weli haysta amni darro qoto dheer: rabshado heer sare ah oo waxyeello badan geysta, weerarro arxan darro ah oo ay Al-Shabaab qaaddo, fursadaha lagu helo caddaalad iyo adeegyada asaasiga ah oo kooban, maamullada degaanada oo meesha ka maqan, saboolnimo ragaadday, dakhli iyo shaqo la'aan.

Dalku wuxuu u nuqul yahay isbellada ba'an ee cimilada. Dad gaaraya 2.6 milyan oo qof ayaa gudaha ku barakacay. Waa mid ka mid ah meelaha ugu liidata adduunka ee haweenku ku noolaadaan, waxaana si naxdin leh u kooban waxbarashada, shaqada iyo fursadaha nolosha dadka da' yarta ah.

Waxaa caadi ah tacaddiyada iyo ka xayuubinta xuquuqul insaanka, oo ay ka mid yihhin rabshadaha galmada, dhaqamada soo jireenka ah ee dhibaatada wata, xorriyadda hadalka oo kooban iyo xabsiga iyo xariga sharci darrada ah ee loo meel dayin, oo ay ku jiraan carruurta. Waxaan weli la sameynin Guddiga Qaranka Xuquuqul Insaanka.

Muranka xudduudaha, dhaqaalaha, dakhliga, awood qaybsiga iyo cabashooyinka dhexmara beelaha iyo kooxaha danta leh ayaa rabshado isu bedeli kara oo keeni kara dhibaato dheeraad ah iyo barakac bani'aadanimo.

Heshiiska awood qaybsiga 4.5 ee lagu kolkooliyo danaha beelaha waaweyn ee awoodda leh laguna gacan bidixeeyo kuwa taagta daran iyo kuwa laga tirada badan yahay ayaa ogolaaday in horey loo socdo laakiin waxaa ka dhalan kara cabashooyin la isaga faa'iideysan karo.

Ku dhaqanka sharciga ayaa liita. Qaabka Garsoorka iyo Dhaqancelinta ayaa ku dhow in lagu heshiiyo, laakiin tayadu weli way koobantahay. Dowladdu waxay la'adahay hababka lagu xaqiijiyo in xukunada maxkamadaha la fuliyo; taa bedelkeeda, inta badan, dadku waxay xukun u doontaan Al-Shabaab.

Musuqmaasuqu wuxuu ku baahsanyahay nidaamka oo idil, waxaana loo adeegsadaa in lagu helo laguna kaysto awoodda. Wuxuu ciqaabayaa dadka saboollka ah, oo ah kuwa ugu badan. Lacago aan la raadraaci karin oo la is dhaafsanayo ayaa weli ah astaanta qeexda siyaasadda Soomaaliya.

In wax laga qabto musuqmaasuqa waxay u baahantahay oo kale isbedel xagga qaabdhismeedka nidaamka ah – in la dhiso dhaqaalana la geliyo hay'adaha caddaaladda madaxabanaan, in hawlwadeeno si fiican u tababaran oo karti leh loo magacaabo adeegga rayidka ah.

Soomaalidu way ku faanaan abtirka beelahooda, laakiin dalku kama bixi karo in haybta beelaha ay noqo asaaska keliya ee lagu go'aamiyo magacaabidda shaqaalaha. Dadka da'yarta ah ayaa si gaar ah u mudan ha'ado u keena adeegyada.

Marwo Madaxweyne,

Dowladdu si buuxda ayay u ogtahay caqabadahan. Su'aashu waxay ka taagan tahay inay wax ka qaban karto iyo in kale, in beesha caalamku ay bixin karto taageero isku-xiran oo ku filan si ay gacan uga siiyo inay dowladdu wax qabato.

Waxaa jira khatar badan. Afar ka mid ah ayaa aad u muuqda.

Tan koowaan waa khatarta ah in Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee xagjirka ah ay isku dayi doonaan inay weeciyaan horumarka. Inkastoo AMISOM iyo ciidamada Soomaaliyeed ay guulo ka gaareen inay horistaagaan Al-Shabaab, haddana weli waa mid adkeysi leh.

Waxay adeegsataa dilalka alaabulan ee dad gaar ah lala beegsado, qaraxyada walxaha qarxa ee macmalka ah iyo baadka lacagaha ay ka qaado bulshada iyo ganacsatadaba, oo ay ku jiraan kuwa jooga magaalada Muqdisho iyo magaalooyinka kale.

In la maareeyo lana yareeyo khatartan waxay u baahantahay in si nidaamsan hoos loogu dhigo awoodda Al-Shabaab iyo weliba la kordhiyo sharcinimada iyo tayada dowladda. Midina midka kale la'aantii ma shaqeyn doono.

Hirgelinta Qaabdhismeedka Amniga Qaran oo la dedejiyo iyo maalgashi lagu sameeyo Hanaanka Dhammeystiran ee Amniga ayaa lagama maarmaan ah. Kuwani waxay fududeyn karaan qaabab isku xiran oo ay beesha caalamku raacdo.

Laakiin guushu waxay marka koowaad ku xirantahay hirgelinta heshiisyada ay Soomaalidu ka gaaraan kaalimaha iyo mas'uuliyaadka amniga ee dalkoo idil.

Tan labaad waa khatarta ah in isafgaranwaaga siyaasadeed uu gebi ahaanba joojin doono horumarka, meelmarinta shuruucda muhimka ah, iyo hirgelinta dib u habaynta iyo qorshaha amniga dowladda.

Kalsooni darrada ka dhextaagan dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada federaalka, iyo go'aankii ay dowlad goboleedyada federaalku dhowaan ku hakiyeen wada shaqeynta, ayaa ah wax aad looga welwelo.

In lagu guuldarreysto in dib loo soo celiyo kalsoonida iyo iskaashiga waxay farriin gurracan u direysaa Soomaalida iyo saaxiibada beesha caalamka oo isku dayaya inay ku qanciyaan dowladahooda oo shakiga haya in Soomaaliya ay diyaar u tahay taageero maaliyadeed iyo mid amni oo dheeraad ah.

Dowlad goboleedyada federaalka waa inay kulanka soo socda ee Golaha Amniga Qaran ee uu Madaxweynuhu isugu yeeran u adeegsadaan fursad wada shaqeyn wax ku ool ah.

Iyadoo la sii wadayo horumarka la gaaray ilaa iyo maanta, waxaa maalgashi dheeraad ah lagu sameyn karaa tayada dowlad goboleedyada federaalka, iyo in xiriir iyo isgaarsiin dheeraad ah laga helo dowladda dhexe.

In la helo ogolaanshaha dhinacyada waaweyn ee ka midka ah talada qorshaha qaran – oo aan ahayn dowlad goboleedyada federaalka oo keliya, laakiinse ay ku jiraan xildhibaanada baarlamaanka, beelaha awoodda ka dhex shaqeeya, bulshada ganacsatada oo ay ka midyihiin qurbajoogta, odey dhaqameedyada – way adagtahay, waana mid uu ku baxo kharash aad u badan, iyadoo ay soo socdaan doorashooyinka dowlad goboleedyada federaalka iyo kuwa qaran. Laakiin waa lagama maarmaan.

In khatartan la yareeyo waxay u baahan tahay in la raaco qaab laba waddo leh.

Arrimaha asaasiga ah, oo ay ka midyihiin sida ay tahay in awoodda loo wadaago, loo qaybiyo, loona kala saaro, dabeecadda dowladda federaalka, awoodaha ay kala leeyihiin dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada federaalka, waa in wax looga qabto iyadoo la raacayo dib u eegidda dastuurka. Waxaa loo baahan yahay in lala tashado dhallinyarada, haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay.

Fikradaha adag oo kala duwan ee laga qabo nidaamka federaalka waa xalaal laakiin haddii dhaqanka siyaasadeed ay tahay inuu isbedelo waa in arrimahan lagu xalliyo wada xaajood ee aan lagu xallin tallaabooyin iyo go'aano uu hal dhinac qaato.

Caqabadaha ugu waaweyn oo aadka degdegga u ah waa sidii lagu gaari lahaa heshiisyo siyaasadeed oo ogolaanaya in si xawaara ah horey loogu socdo iyadoo aan wax dhibaato ah loo

geysanayn natiijada ka soo bixi doonta dib u eegidda dastuurka. Kuwan waxaa ka mid ah Sharciga Doorashada, isku dhafidda ciidamada amniga, iyo heshiisyada qaybsiga khayraadka iyo dakhliga.

Halkan, kalsoonida iyo isaaminaaddu waa arrinta ugu muhimsan, uguna adag waayo siyaasiyiintu waxay ka shakisan yihiin ama u haystaan in ujeeddada ugu weyn ee kuwa ay is hayaan ay tahay in iyaga meesha ka saaraan ama bedelaan.

Fahamka mucaarad wadani ah waa mid liita, xeerarka cayaarta siyaasaddana ma kala cadda mana kala qeexna. Soo jeedinta mooshinada kalsooni kala noqoshada, xil ka qaadidda iyo doorashada ayaa si xun loo adeegsadaa loona isticmaalaa in lagu gaaro ujeeddo maaliyadeed iyo mid siyaasadeed. Waxay u baahan yihiin in dib u habayn lagu sameeyo.

Kaalinta siyaasiyiinta waa inay noqotaa inay wax qabtaan oo ayna noqon inay hormariyaan danaha beesha ama danahooda gaarka ah. Tani waqti bay qaadan doontaa, waxayna dhici doontaa oo keliya haddii heshiisyada iyo geeddi socodyada loo arko inay yihiin kuwo xalaal ah ayna ka dhashaan wada shaqeyn wax ku ool ah.

Kalsoonidu waxay u baahan tahay in la qadariyo hanaanka sharci loona heellanaado dhaqan rabshad la’aan ah, rabitaan in dadka lala shaqeeyo, loona tanaasulo danta guud. Tani waxay ahayd farriintii aan kaga soo tagay madaxda Soomaaliyeed.

Khatarta saddexaadhe, inkastoo Golaha Amaanku uu midaysan yahay, haddana waxaa jirta kala qaybsanaan ka dhexjirta beesha caalamka. Tani dhowr dhinac ayay leedahay.

Qorshaha dowladda ee dib u habaynta amniga, siyaasadda, iyo dhaqaalaha wuxuu noqon doonaa mid aad loogu guuleysto haddii la hawlgalayaashu ay iska la shaqeeyaan asaaska qorsheyaasha qaran ee lagu heshiiyay iyo nidaamyada maareynta ee kartida leh.

Meelaha qaar, shaqadan, iyo natiijada ka dhalata aad bay u fiican yihiin – oo ay ka mid yihiin dhanka bani’aadanimada, taageerada doorasho iyo dib u habaynta dhaqaale iyo midda maaliyadeed. Wada shaqeynta xoogan waxaa dhexda uga jira Qaramada Midoobay iyo hay’adaha maaliyadda caalamiga. Waxaa hadda so socda taageero miisaaniyadeed oo intan aad uga heer sarreysa oo ay ka mid yihiin kuwa laga helo Midowga Yurub iyo Norway.

Laakiin meelaha kale, gaar ahaan amniga, waxaa ku xoog badan qaababka laba geesoodka ah, taasoo adkeynaysa fursadaha guusha.

Meel kale oo ay lagama maarmaan tahay in la diido kala qaybsanaanta ayaa ah asaaska ay AMISOM ku sii joogi doonto Soomaaliya.

Ciidamada AMISOM waxay mudan yihiin in loo helo dhaqaale la isku halleyn karo iyo aragti cad oo ku aaddan hoos u dhigiddooada, taasoo lagu saleynayo dib u qaabeynta ku xiran horumarka laga gaaro hoos u dhigidda awoodda Al-Shabaab, iyo tayada muuqata ee ay ciidamada Soomaaliyeed u leeyihiin inay la wareegaan mas’uuliyaadka amniga.

In ciidamada AMISOM ay baxaan iyadoo la gaarin waqtigii ku haboobaa waxay noqon kartaa masiibo; laakiin si ay u sii joogaan, taageerada la siiyo AMISOM iyo weliba taageerada la

siiyo hay'adaha amniga Soomaaliyeed waxay u baahan tahay guul laga gaaro hagaajinta amniga dadweynaha.

Soomaalidu waxay la wareegeen lahaanshaha kalaguur xaaladda ku saleysan; AMISOM waxay gacan ka geysan karaan in lagu guuleysto.

Kaalinta UNSOS waxay u baahnaan doontaa inay isbedesho mar alla marka uu kalaguurku uu hore u socdo; dib u eegidda hadda lagu hayo UNSOS ayaa ifin doonta arrintan.

Imtixaan kale oo ay marayso midnimada beesha caalamka wuxuu la xiriiraa sida ay Soomaaliya ugu nugushahay ishardinta la hawlgalayaasha caalamka, oo ay ka mid yihiin kuwa Khaliijka.

Jawiga ay abuurtay dib u soo laabashada hawlaha diblomaasiyadeed ee Geeska Afrika iyo heshiiska dhexmaray Ethiopia iyo Eritrea ayaa laga yaabaa, waan rajeynayaa, inay noqoto mid faafta.

Saameynta ay yeelanayso ee laga helayo waxaa ka mid noqon kara in la xakameeyo ama degdeg loo xalliyo colaadaha u dhexeeya Soomaalida, oo ka mid yihiin wadahadal dhexmara Hargeysa iyo Muqdisho oo loo baahan yahay in la dib loo billaabo, iyo in la helo asaan caqligal ah oo ay Soomaaliya kaga faa'iideysan karto xiriirka soo jireenka ah iyo taageerada ay la leedahay *dhammaan* saaxiibadeeda.

Khatar afaraad ayaa ah in dadweynaha ay mar kale soo foodsaari doonto masiibo bani'aadanimo oo dhici karta. Nasiib darro, khatarta ah in arrintan ay dhacdo way sarreysaa, oo malaayiin dad ah ayaa durba qarka u saaran inay ku noolaadaan meel geeska ka ah nolo sharaf leh.

Qalalaasaha mustaqbalka wuxuu ka dhalan doonaa arrimo isbiirsaday oo kala ah isbedelka kedis ah oo cimilada la xiriira, colaad hubaysan oo ay Al-Shabaab kiciso iyo cabashooyin aan la xallin, tartan loo galo khayraadka dabiiciga ah iyo kooxo gaar ah oo si guud oo nidaamsan loo gacan bidixeeyo.

Ujeeddadu waa inay noqotaa in la yareeyo nuglaanshaha dadka iyadoo shaqo la abuurayo, la maalgashado magaaleynta, maareynta biyaha, helidda tamar nadiif ah iyo in wax lagu kordhiyo qiimaha awoodda dhaqaale ee dalka ha ahaato xoolaha nool, kalluumeysiga, beeraha ama tiknoloojiyada casriga ah.

Marwo Madaxweyne,

Mustaqbalka Soomaaliya wuxuu ku jiraa gacanta dadka Soomaaliyeed. Dowladdan way aqoonsan tahay arrintan, anigana waxaa ammaan u soo jeedinayaa sida ay uga go'antahay inay dib u soo nooleyso gobanimada Soomaaliya.

Hasee yeeshee, rabitaan siyaasadeed oo keliya kuma filna. Waxaa lagama maarmaan ah in la helo tayo dhab ah, iyo sidoo kale in lagu guuleysto in la xoojiyo siyaasad dhab ahaantii loo wada dhanyahay – taasoo aan ahayn mid si fudud lagu gaari karo iyadoo lagu jiro xaaladdan

dhaqaalaha siyaasadeed ee ku dhaawacantay 30 sanno oo colaad hubaysan ahayd, oo ay jiraan qaswadeyaal amni darrada ka macaasha.

Guul waxay ku xiran tahay madaxda siyaasadda, ganacsatada, odey dhaqameedyada iyo madax kale oo u wada shaqeynaya danta guud, iyagoo ka fa'iideysanaya awoodda dhaqaale ee dalka si isbedel loogu keeno dadka – gaar ahaan da'yarta.

Shakiga laga qabo inay arrintan weligeed dhacdo, in Soomaalidu ay heli karto asaas ay ku xallin karaan mushkiladahooda, ayaa la jebiyay dhowrkii sanno ee la soo dhaafay. Waxaa hadda jira dareen ah in taasi ay *suurtagal tahay* – oo aan ahayn oo keliya *mid aan dhici karin*.

Hadba inta ay madaxda siyaasaddu muujiyaan midnimo, waxaa ballaaranaya fursadaha, iyo mas'uuliyadda, ay saaxiibada beesha caalamku ku maalgashadaan dhammaan qaybaha dalka iyo madaxdiisa.

Marwo Madaxweyne, aan ku soo gunaanado hadalkayga mahad aan ugu soo jeedinayo Golahan taageeradiisa joogtada ah ee uu u hayo Soomaaliya, Qaramada Midoobay iyo aniga iyo kooxdayda ila shaqeysa. Waxay ii ahay mudnaan iyo Sharaf inaan la soo shaqeeyay saaxiibada beesha caalamka, iyo intaa ka hor, madaxda iyo dadka Soomaaliya.